# MACLUUMAAD KU SOCDA CARRUURTA IYO DHALLINYARADA KA HOOSEYSA 18 SANO OO KU AADDAN DIIWAANKA KANSARKA CARRUURTA EE ISWIIDHISHKA

Kansarka iyo cudurrada leeska dhaxlo, tusaale ahaan cudurrada dhiiggu kuma badna carruurta. Laakin taas ah in ay cudurradani aad ugu yaryihiin carruurta ayaa keeneysa in ay annaga caafimaadka ka shaqeeyna nagu adagtahay in aan helno qaab cusub oo wax ku ool ah oo loo daweeyo carruurtaas oo bogsiinaya kuwa sidaas oo ay tahay la bukooda cudurradaas. Waxaan isku dayeynaa in aan helno daweynta ugu fiican annagoo carruur badan isku si u daweyneyna, dabadeedna eegeyna sida ay natiijadu noqoto marka la barbar dhigo sidi ay wax ahaayeen markii hore, ama iyadoo la barbar dhigayo koox kale oo carruur ah oo si kale loo daweeyay. Si is babar dhig nuucan ah uu u noqdo sida ugu fiican ee suurta galka ah waa in canug walba macluumaad looga ururiyaa diiwaanka. In la isu geegeeyo, lana lafa guro macluumaadkan ayaa dabadeed lagu fahmi karaa sida daweynta lagu sii hagaajin karo si in badani ay u caafimaadaan.

Si loo horuumariyo, loona xaqiijiyo tayada xagga caafimaadka wuxuu Daryeel bixiyahaagu

macluumaad kugu saabsan u gudbinayaa Diiwaanka Tayada ee Qaranka - Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka. Hey’adda dhexe ee dowliga ah ee macluumaadka mas’uulka ah waa isbitaalka jaamacadda ee Karolinska oo leh mas’uuliyadda guud ee sharci ahaaneed ee macluumaadka shakhsiga ah ee Diiwaanka Kansarka Carruurta. Daryeel bixiyahaaga

ayaa ah cidda macluumaadka shakhsiga ah mas’uulka si ay ugu maareyso si la xiriirta in macluumaad la ururiyo, loona dhiibo Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka.

## WAXAAD GACAN KA GEYSANEYSAA IN LA HELO DARYEEL KAN KA WANAAGSAN

Iyadoo la kaashanayo macluumaadka diiwaanka ku jira iyo baaritaannadi la keydiyay ayaan rejeyneynaa in aan si dheeraad ah u sii hagaajinno natiijada daweynta, isla mar ahaantaasna u yareyno waxyeello dhinaceedka dawooyinka. Si aan jawaabo sugan ugala soo bixi karno waa in aan macluumaad ka soo ururinnaa carruur iyo dhallinyaro tiro ahaan nagu filan. Maadaama cudurradani aysan carruurta ku badneyn, waxaan mararka qaarkood u baahannahay in aan iskaashi la yeelanno dhakhaatiir waddamo badan kala joogta si aan macluumaad uga helno carruur tiro ahaan nagu filan. Waxaa lagu heshiinayaa qoraal daweyn oo loo wada dhanyahay oo ku saleysan dhammaan aqoonta jirta.

Si natiijada loo barbar dhigi karo bukaan horay loo daweeyay, waxaa la ururinayaa macluumaadka bukaanka ee la xiriira cudurka iyo daweeynta. Macluumaadkan

waxaa lagu keydinayaa diiwaan yaalla mid ka mid ah waddamada qoraalka iska kaashanaya. Mar walba waa in bukaanka looga warramaa diiwaan gelinta nuucan ah. Mararka qaarkood waa in la haystaa oggolaashada bukaanka si macluumaadka loogu keydin karo diiwaan nuucan ah. Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn in aan macluumaad ka soo ururinno qeybaha caafimaadka ee caafimaadkaaga ku hawlan haddii aad ka baxday Qeybta Carruurta.

In laga qeyb qaato Diiwaanka Kansarka Carruurtu maaha mid khasab ah, taasina ma saameyneyso daryeelka aad heleysid.

## MACLUUMAADKA LA DIIWAAN GELINAYO

Si loo horumariyo, loona xaqiijiyo tayada daryeelka caafimaadka waxaan rabnaa in aan diiwaangelinno macluumaadka sida nambarrada shakhsiga ee aqoonsiga, jinsiga, taariikhda bukooshada, xiriirrada hey'adaha caafimaadka, baaritaannada, daweynta, natiijooyinka baaritaannada ka soo baxa, baaritaannada raajiyaha, tilmaamaha gaarka ah ee cudurka iyo xaaladda caafimaad ee gadaasha dambe.

Macluumaadka waxaa loo sii gudbinayaa Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka, laga yaabeena in loo gudbiyo xarunta diraasadda ee mas'uulka ka ah qoraallada daweynta ee la isticmaalay (xaruntaas diraasadda waxaa laga heli karaa waddan kale).

## QARSOODIDA IYO AMMAANKA

Macluumaadka ku jira Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka waxaa ilaalinaya xeerarka qarsoodida. Waxay taasi ka dhigantahay in aan wax macluumaad ah la dhiibi karin haddii ay jirto khatar ah in taasi dhaawac kuu keeni karto. Waxaa jira shuruudo gaar ah oo ku aaddan tallaabooyinka ammaanka si loo hubiyo in cid kale aysan macluumaadka heli karin. Waa la koontarooli karaa in cid dibadda ah aysan macluumaadka wax ka helin. Macluumaadkaaga waxaa lagu ilaalinayaa maldahid, waxaana loo baahanyahay gelitaan si macluumaadka loo akhristo.

## HELITAAN KARID

Mararka qaarkood waxaa dhici karta in dhakhtar carruurta ee mas'uulka ka ah maamul gobaleedkaaga iyo dadka ay shaqadoodu tahay koontaroolidda tayada diiwaanku in ay toos u heli karaan. Cid laamaha caafimaadka dibadda ka ah toos uma heli karto macluumaadkaas.

Macluumaadkaagu wey ku sii jirayaan diiwaanka ilaa iyo inta weli loogu baahanyahay cilmi baaris iyo horuumarin. Warbixinnada cilmi baarista iyo waxyaabaha kale ee leesu ururiyay kuma jiri doonaan macluumaad keenaya in adiga ama bukaannada kale la aqoonsan karayo.

- Xaq baad u leedahay in aad maya dhahdid in macluumaadkaaga shakhsiga ah lagu diiwaan geliyo Diiwaan Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka.
- Xaq baad u leedahay in goor kasta oo ay tahayba aad keentid in macluumaadkaaga laga tirtiro diiwaanka.

## DIIWAANKA TAYADA, DIIWAANKA KANSARKA CARRUURTA EE ISWIIDHISHKA

- Xaq baad u leedahay in aad macluumaad ka heshid wixi adiga diiwaanka lagaaga qoray.
- Haddii qeyb macluumaadka kugu saabsan ka mid ah ay khaldantay waxaad xaq u leedahay in qeybtaas la saxo.
- Xaq baad u leedahay in aad warbixin ka heshid qeybta daryeelka/qofka macluumaadkaaga argagtay.
- Xaq baad (megdhaw) u leedahay haddii aan xeerka qarsoodida la raacin.

### MACLUUMAADKA SHAKHSIGA AH

Haddii aad rabtid in aad macluumaad dheeraad ah ka heshid Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka ama macluumaadka lagaa diiwaan geliyay waxaad la xiriiri kartaa:

Diiwaanka tayada ee qaranka – Diiwaanka Kansarka Carruurta, Machadka Karolinska, Qeybta cilmi baarista Kansarka Carruurta,Tomtebodavägen 18A, vån 8, 17177 Stockholm (Solna)

Taleefan:+46 8 52482365

E-mail: svenska-barncancerregistret@kbh.ki.se

Haddii aad rabtid in aad Wakiilka ilaalinta macluumaadka kala xiriirtid

ama Isbitaalka Jaamacadda Karolinska:

Dataskyddsombudet
Karolinska Universitetssjukhuset
17176 Stockholm
Taleefan: 08-517 700 00 (xiriirin)
E-mail: dataskyddsombud.karolinska@sll.se

Haddii aad u aragtid in aadan helin macluumaad kugu filan waxaa fiican in aad la hadashid dhakhtarka mas'uulka ah. Waa muhiim in aad weydiisid wixi aad wax is weydiineysid.

*Hal koobbi oo macluumaadkan ah waxaa la siinayaa bukaanka.*